

AafoQaran

"Buufiska & Dhalinyarada"

Tusmo

©XUQUUQDA DAABACAADDA.....5
TAARIIKH NOLOLEED.....6
AFEEF.....7
HIBAYN.....8
MAHADNAQ.....9
HORUDHAC.....10

CUTUBKA 1aad Horudhaca Buufiska

DHALINYARADA IYO BUUFISKA:.....13
WAA MAXAY BUUFIS?.....14
MAXAA SABABA BUUFISKA.....14
WAALIDKU MAXAY QABAN KARAAN?.....16
TAAGEER XIRIIRADA WANAAGSAN.....16
DHAGEYSO.....16
GOORMEE KAALMO LA RAADIYAA?.....17

CUTUBKA 2aad Calaamadaha Buufiska

CALAAMADAHA BUUFISKA.....20
CALAAMADAHA LA SOCDO.....20
DADKA QABA BUUFISKA XAGGEE U BADANYIHIIN?.....21
KAALIN INTEE LA EG AYAY KU LEEYIHIIN CUDURKA BUUFISKA EE FARAHA BA'N KU HAYA DHALINYARADDA SOOMAALIYEED EHELADDOODA KU NOOL QAARADAHA YURUB IYO AMEERIKA IYO QEYBA KA TIRSAN QAARADDA AASIYA.....24

CUTUBKA 3aad Safarada Dhalinyarada Iyo Marinkooda

SAFARADA DHALLINYARADA IYO MARINKOODA:-27

HADDABA WAA MAXAY TAHRIIBKU AMA TAHRIIBINTU? 27

SABABAHA KEENA TAHRIIBKA 28

SABABAHA TARHIIBKA DHALINYARADA 28

MARINADA TAHRIBAYAASHA 30

TAHRIIBKA IYO SAFARKA BADDA..... 38

HADDABA MAXAA LAGA HELAA XEERADDA SALKEEDA 47

MAXAA LAGALA KULMAY? 47

QISO DHAB AH "TAHRIIBKA IYO NATIIJADIISA" 49

CUTUBKA 4aad Dhibaatooyinka Buufiska

MALISKU GUDBIYAA BUUFISKA?..... 57

MALOO DHINTAA BUUFISKA? 57

DHACDO DHAB AH BUUFISKA IYO DHIBAATADIISA 57

CUTUBKA 5aad Daawada Buufiska

DAAWO MALEEYAHAY BUUFISKA ? 65

QALBIGAAGA KA NADIIFICUDURKA BUUFISKA..... 71

CUTUBKA 6aad Gabagabo Iyo Talo Bixin

GABAGABO 73

TALO BIXIN 75

Tixraaca Buugga..... 78

©XUQUUQDA DAABACAADDA

Xuquuqda daabacadda waxay u dhowrsantahay qoraaga buuggan, Ridwaan Nuur Cabdi (Ridwaanurabbi). Lama daabici karo ama lama badin karo guud ahaan ama qeyb kamid ah iyadoo ogolaansho qoraal ah laga heysan qoraaga.

Daabacaadii Labaad,

August 2018

Muqdisho, Somaaliya.

TAARIIKH NOLOLEED

Magaceygu waa Ridwaan Nuur Cabdi "Ridwaanurabbi" waxaan ku dhashay Muqdisho 12/3/1990, waxbarashadayda qur'aanka kariimka, waxaan ku qaatay malcamada Al-Qudus, Dugsiga hoose iyo Dhexe, waxaan ku qaatay Cabdulaahi Ciise Maxamuud, Dugsiga sarana, waxaan ku qaatay Al-Xikma, sidoo kale, waxaan ka baxay kuliyadda cilmiga kumbuyuutarka Jaamacadda Plasma, waxbarashada heerka koowaad ee jaamacadda, sidoo kale waxaan ka baxay kuliyada injineernimada sooftiweerka ama"Software Engineering" jaamacada **Daffodil International University**, Dhaka Bangladesh heerka labaad ee jaamacadda master digrii.

Waxaan kusoo biiray bahda qalin maalka oo aan jeclahay haduu Alle yiraahdo mustaqbalka inaan heer ka gaaro, qalinkeygu wuxuu xor ka yahay inaan wax ka qoro siyaasadda, qabyaalada iyo wixii la halmaala, waxaan jeclahay wacyi gelinta iyo hormarinta Bulshada.

AFEEF

Waxaan ka afeefanayaa, wixii qalad ahee iga dhacay inuu yahay mid aanan u qasdin, cidii markaa aragta waxaan ka codsanayaa inay igu baraarujiso waxaa kale oo aan ka afeefanaya afka soomaaliga aan ku qoray buuggan oo ah afka caadiga ah ee dadku isku fahmaan iskuma aanan taxluujin inaan af suugaaneed ku qoro, sababtoo ah da'yarta maanta joogta ee aan doonayo inaan la hadlo waxa laga yaabaa inay ku adkaato. Haddii ay jiraan in kalmado qoraalkooda ay dadka gobollada kala duwan daga ay fahmin, waxaan ka codsanayaa in la ii cudur daaro, waayo aniga waxba ma hagran inta aan awooday.

Ugu dambeentii wixii aan asiibay waa mid xagga Allah ka yimaaday wixii aan ku gafayna waa mid nafteyda iyo shaydaanka xaggiisa ka yimaadeen.

Fadlan dhammaan wixii cabasho, talo, dhaliil, wax ku darid iyo wax ka dhimisba ah igala soo xariir:

Email:ridwaanplasma@gmail.com
Cellphone:+252615288889.

Allaa mahad leh!

HIBAYN

Aafo Qaran "Buufiska Iyo Dhalinyaradda" waxaan u hibeeyay Ayeeydey Faadumo Khaliif Xasan Abdi(Allow Qabriga u Waasici Aakhiranna Jannatul Firdowsa Ku Abaal Mari) Iyo Awowgeey Dr.Shariif Cali Cabdulkariim, cimri dheer iyo caafimaad ayaan Allah uga baryayaa, la'aantoodna guul mangaareen.

MAHADNAQ

Allaha weyn ee gacanqabashadiisa la'aanteed ay waxba ii suura galeyn ayaa mahada koowaad, tan labaadiyo tan saddexaadba leh Allaha caafimaadka caqliga iyo garashad aaanku howgalay I siiyey, ayaa mahadaa is kaleh .

Hooyo Maano Shariif Cali, Aabo Nuur Cabdi Axmed, ayaa iyaguna u mahad celinayaa cimri dheer iyo cafimaad Allah siiyo la'aantooda guul ma gaareen

Ugu dambeentii waxaan aad ugu mahadcelinayaa Dhamaan Waalidinteeyda, walaalahey, saaxibadeey intaan bahwadaagta nahay iyo waxsoo wada baranay dhamaantiin anoo idin kala saarsaareen, waad mahadsantihiin Rabbi wanaag iyo heybad ha idin siiyo.

HORUDHAC

Magaca Eebbe ayaan ku bilaabanayaa ee naxriista guud iyo mid gaarba.

Tahriibka da'yartu waa aafo Qaran, musiibo ummadeed iyo mushkilad caalami ah.

Buuggaan oo lamagac baxay Aafo Qaran "Buufiska iyo Dhalinyarada" waxaan jeclahay inaan uga faaideeyo ummada Soomaaliyeed gaar ahaan dhalinta maanta iyo kuwa barrito inay ka digtoonaadaan cudurka 'Buufiska' kaas oo waayahan dambe dhaliyay in dhallinyaro fara badan ay nafsadooda ku haligaan badda iyo barigaba iyagoo tahriib u ah dalal shisheeye.

Waxaa dhab ah, in buufiska maanta uu marayo heerkii ugu sarreeyay marka loo eego xiliyadii hore, waxaad arkeysaa markaad tagto meelaha dhalinyarada isagu yimaadaan sida maqaayadaha lagu shaaho inta badan, in dhalinyarada ay ka sheekeysanayaan buufiska, qaarkood waxay leeyihiin "waxaa I haya buufis xun habeenadaan ma seexdo waayo magaaladan waan nacay oo way iga hor timid iyo hadallo kale oo aad u fara badan".

Wixii ka dambeeyay sanadii 1991 waxaa dhacay in soomaali badan ay Dalka isaga qaxeen iyagoo nolosha markaa ka jirtay Dalka oo aheyd mid aad u liidata dadkuna ay qax, colaado sokeeye, abaaro iyo dhibaatooyin dhanka nolosha ah ay lasoo deristay ayay taasi sabab u noqotay tahriib baahsan oo dhanka badda iyo barigaba ah in ay soomali badan nafsadooda ku haligaan.

Dadka soomaaliyeed ayaa dhibaatooyin kala duwan kala kulma tahriibka iyagoona naftooda ku biimeeya badda u dhaxeysa Soomaliya iyo Yemen iyo sidoo kale dhulka

saxaraha ah ee Suudaan iyo Liibiya iyadoo Dalalka sida ba'an loogu dhibaateeya Soomalida markey tahriibka soo galaan ay ka mid yihiin Dalka liibiya oo isagu ah xarun ay ku kulmaan dadka soomalida ee nolol raadiska ah iyo Sacuudiga oo isagana ah xarunta ugu weyn ee lagu dhibaateeyo dadka Soomaliyeed ee tahriibta ah markey soo galaan iyadoo dadka soomaaliyeed ee tahriibaayo soo gala dhalinyaro, odayaal, dumar iyo caruurba, hasa yeeshee dhibaatada ugu weyn ee tahriibta waxaa la kulma haweenka Soomaaliyeed oo iyagu ah kuwa u nugul dhibaatada iyagoona ay soo wajahaan dhibaatooyin badan sida kufsi, jirdil iyo wixii la halmaala.

Gudaha buugga ayaad kaga bogan doontaan erayga Buufis, kaasoo sabab u noqday in dhalinyaro fara badan ay ku halaagsamaan badaha iyo dhulka saxaraha ah, sidoo kale waxaa buugga ku jira sheekooyin ka hadlaya dhibaatooyinka buufiska iyo tahriibta.

CUTUBKA 1aad
Horudhaca Buufiska

NB.

Haddaad U baahantahay Buuggan Iasoo xiriir Qoraaga:-

Mr Eng Ridwan Nor Abdi
+252615288889
ridwaanplasma@gmaiL.com

Tixraaca Buugga

1 http://www.somalitalk.com/

2 http://bufiska.blogspot.com/

3 http://solaportal.com/

4 http://waaheen.com

5 http://warsheekh.com/

6 http://doobir.blogspot.com/

7 http://puntlandi.com/

8 Tahriib iyo Turunturoodka Nolosha. Maqaal Abwaan Qorane

9 Eng Abdirizak Abyad (Baxsad iyo Baadigoob)

10 Abwaan Cawil Cali Warsame (Luqmaan)

11 Maansada Tahriib waa erayadii AbwaanAxmed C/laahi (Axmed Fartaag).

12 Heestii Axmed Mooge

13 Hestii Hiba Nuura

14 http://www.ceegaag.net/

15 Axmed Ismaaciil Maxamuud (Axmed deeq)

Oraahda Aqristayaasha

Marka hore mahad oo idil waxay u sugnaatay Allah, Marka Xigta waxaan U Mahadcelinayaa Qoraaga Buuggan Kaasoo Si Buuxda Uga Hadlay Dhibaatada uu leeyahay Cudurka waayahan Dambe Haligay Dhalinteena Soomaaliyeed kaasoona biday iney ku La'daan Saxaraha iyo Badweynta. Waxaan kaloo ku dari lahaa Dardaaran yar aan kula dardaarmaayo dhalinta Soomaaliyeed oo aan Oran lahaa Talo iyo tusaalaba waxaa idinkugu filan inta badaha ku baaba'day, saxaraha bahal uu ku cunay, Duurkana haraad iyo Gaajo ugu geeriyoday. Dhalinyarooy Ha tahriibin ee joog ,tanaad adigu leedeee.

Guddoomiyaha Degmada Waaberi

Mahad Cilmi Cali

Tahriibku waa Tiiraanyo Bulshooy ka Digtoonaada

Xoghayaha Degmada Waaberi

Maxamuud Cabdi Axmed

Tahriibku waa sida nabaad guurka oo kale Waayo dhulka hadii laga jaro dhirta Waxay dabeeshu qaadaa caradda san Wuxuuna isku badalaa dhul lama degaan qalalan Sidoo kale tahriibku wuxuu sababa iney baxaaan ama inuu wadankii waayo muruqa iyo maskaxdii wadanka oo ah jiilka so baxaya waxaana dhacda in muruqoda iyo maskaxdooduba ay ka faaideystaan maskax shisheeye uuna wadankii nabaad guur maskax iyo muruqba ku dhoco.

Cismaan Shariif Cali

Shirkadda Isgaarsiinta HORMUUD

Dhalinta Soomaaliyeed Meel waliba ey joogan waxan ku boorinayaa inay dalkooda Aaminaan wax kabartaan kuna dhex shaqeystaan.

Maxammed Sheekh Cumar Cusmaan

Guddoomiye ku Xigeenka Jaamacadda Plasma

Waxaan umahad celinayaa wiilka da'da yar ee qoray buuggan danbcan dhalinyaro waad aqriseen buugan waxan aniga idinku biirin lahaa inaad maanta kadib ukacdaan saad udabar jari laheydeen buufiska iyo saamenta uu ku leeyahay dalkeena.

Cabdirisaaq Maxamed Axmed

Maamulaha Shirkadda Dhismaha EABCO

"WALAAL HA KA TAHRIIBIN DALKAAGA"

Nin walaalkey ah oo qurbaha in badan ku noolaa ayaa eray aad ii soo jiitay igu dhahay waxuu igu yiri walaal meshaan aan joogno oo yurub irsaaqadaada waad taqaanaa sidoo kale waxuu igu yiri germany waxaan soo galay 2014 ilaa maantay irsaaqadeyda waxa i soo galay iyo sida aan u baxshay hadii la i weydiiyo mid mid ayaan u aqaanaa sababtuna waa in aan ka helno irsaaqadeena hal meel.

Hadii xitaa hooyadaa eey kuu soo dirto 200 boqol oo dollar waa lagu weydiinaa iskabada daa in wax ka badan laguu ogolaado in aad hesho,

Waxaan arkay meel feel loogu jiro cunto dalka france ee caasimada Paris waxaan weeydiiyay dadkan maxeey qabanaayaan waxuu igu yiri in la dharjiyo oo irsaaqada laga dharjiyo lama ogola in eey baahi u dhintaan.

Waxaan arkay dhalin yaro soomaaliyeed oo mid waliba uu wato boorsarada dhabarka waxaaan weeydiiyay mid ka mid ah dhalintaas oo aan ku dhahay walaal ma hada ayaad soo gashay wadanka markaas ayuu igu dhahay, maya maxaad boorsada u wadataa? waxuu igu dhahay walaal meel aan caawa seexanaayo ma aqaano waxaan ku dhahay meeshan sharci iyo waxba kama helin miyaa walaal? waad arkidoontaa dad badan oo aan soomaali kaliya aheen oo dhabarka boorso ku wato dhamaantooda Negative-ka ama diidmada ayaa ku badatay oo inta badan Europe weey diideen in eey qaabilaan waxaan maqli jiray "hebel go'iisa ayaa garabka u saaran"

Waxaa igu soo dhacday markaan arkay labo nin oo walaala ah oo soo wada tahriibay una soo socday nolosha taalo europe nasiib Xumo kuwada dhintay bada u dhaxeysa talyaaniga iyo liibiya una dhaxeysay dhimashadooda sanad yar calool xuma ma aanan qabeen hadeey naftooda ku weyn lahaayeen meel ka fiican Europe waxaan idin leeyahay kuwa wali ku sii socdo liibiya hadaad geerida ka badbaadaan u dhaxeysa liibiya iyo talyaaniga waxeey u badantahay in aad maalin dhihidoonto noloshaan europe waxaa ii dhaantay in aan doonta ku dhinto ma hubo in dadku saas wada dhihi doonaan laakiin shaki iigama jiro dad badan oo aan arkay in eey shalaay ka joogaan joogista halkaan Europe.

"Ilaahayow Irsaaqadeena hal meel ha ku xirin"

Cabdullaahi Xuseen Nuur

Kaaliyaha gaarka ah ee wasiirka maaliyada

Dhamaad